

Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Saint Paul Public Schools ee 2026-2033

spps.org/2033

Saint Paul
Public Schools



Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul,

Waxaa sharaf ii ah inaan soo bandhigo SPPS 2033, oo ah geeddi socod istiraatiiji ah kaas oo hagi doona mudnaanteenna, maalgashigeenna iyo meelaha aan diiradda saari doonno toddobada sano ee soo socota.

Diyaarinta qorshahan ayaa ahayd shaqo ay wada qabteen bulshada oo dhan. Qoysaskeenna, ardaydeenna, shaqaalaheenna iyo la-hawlgalayaasheenna waxay aamineen in haddii ay na siiyaan codkooda, aanu si daacad ah horay u sii wadi doonno. Waxaan aaminsanahay inaan intaas un samaynay, oo qorshahan uu yahay bilowga.

Tan iyo marki aan noqday kormeere guud bishi May 2025, waxaan diiradda saaray hal shay oo ka sarreeya wax kasta oo kale: dhageysiga. Taani waxaa ku jiray wakhti aan ku qaatay fasallada iyo la sheekaysiyada ardayda. Haddii uu jiro hal wax oo aan ka bartay shaqadan, waa in dhalinyaradeena ay hoarayba u garanayeen waxa ay u baahan yihiin. Shaqadeenu ma ahan inaan u go'aaminno. Shaqadeenu waa inaan dhisno qaab-dhismeedyo noo oggolaanaya inaan dhagaysanno, kadibna aan yeelanno dhiirranaanta aan tallaabo uga qaadno wixii aan maqalnay.

Bishi Nofeembar 2025, waxaan talo u soo jeediyay Guddiga Waxbarashada inay diyaariyaan qorshe istiraatiiji ah oo cusub. Waxaanu samaynay koox hawleed ka kooban 32 qof, oo ay ku jirto tiro badan oo arday ah. Ma aha boos buuxis, balse sidi ka-qaybgalayaal buuxa. Waxaan soo arkay qorshayaal istiraatiiji ah oo lagu diyaariyay qolalka shirarka kadibna loo geeyay dadka shaqadaas ku dhex jira maalin kasta. Ma rabin inay taasi ka dhacdo halkan.

Iyada oo loo marayo hannaankeenna, shaqaalaheenna waxay dhagaysteen oo ay ka amba qaadeen wixi ay bulshadeenna noo sheegtay. Si wadajir ah, waxaan diyaarinay istiraatiijiyado ballaaran oo looga faa'iidaysanayo wixi aan horayba u qabanaynay si fiican isla markaana wax looga qabanayo waxa aan u baahanahay inaan u qabanno si ka duwan. Wixi soo baxay ayaa ah SPPS 2033. Saddexdeenna mudnaan—Waxbarid Heer Sare ah, U-wada-dhannaansho Loo Qasday iyo Kaabayaal Waara—ayaa udub-dhexaad u noqon doona wax kasta oo aan u qabanayno degmo ahaan, ka qabanayno dugsi kasta iyo fasal kasta dhexdiisa.

Inkastoo waxyaabaha ku jira qorshahan ay i dareensiinayaan sharaf weyn, haddana waxa ugu weyn ee aan ku faanayo ayaa ah in arday ka-qaybgalay mid ka mid ah kulammada kooxda hawsha ay akhrisan karaan qoraalkan isla markaana ay ka dhex garan karaan codkooda. Qoys noo sheegay arrin adag oo ay kala kulmeen dugsiyadeenna ayaa arki kara inaanan kaliya dhageysan; balse aan samaynay wax aan uga jawaabayno.

Shaqadani waa aasaaskeenna. Waan sugi la'ahay inaan arko waxa aan dhisno, si wadajir ah.

Salaan wacan,

Dr. Stacie Stanley
Kormeeraha Guud

“

Geeddi socodka oo dhan, waxaan dareemay in codkayga la maqlay lana qadariyay. Waxaan ka mahadnaqayaa fursadaha naloo siiyay in aan wadaagno aragtiyaheenna, weydiinno su'aalo, oo kana qaybqaadanno wadahadallo macno leh oo ku saabsan mustaqbalka Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul.

- Waalid

Horudhac

Saint Paul Public Schools (SPPS) ayaa dejiyay isla markaana diyaarinaya inay hirgeliyaan qorshaha istiraatiijiyadeed ee cusub, SPPS 2033. SPPS 2033 ayaa hagi doona isla markaana jihayn doona mudnaanaha, maalgashiga iyo meelaha diiradda la saarayo toddobada sano ee soo socota (2026-2033). Warbixintani waxay faahfaahinaysaa qorshaha, oo ay ku jiraan hannaanka dejinta, doorarka iyo mas'uuliyadaha, iyo qorshaha hirgelinta.


Soo Koobidda Ka-qaybgalka Bulshada

Warbixinta 100-Maalin

Diyaarinta SPPS 2033 waxay bilaabatay Oktoobar 2025 iyadoo lagu bilaabay bandhigga Warbixinta 100-Maalin ee Kormeere Guud Dr. Stacie Stanley. Warbixinta waxaa lagu saleeyay bilaheedi u horreeyay ee ay joogtay degmada, xilligaas oo ay boqolaal daneeyayaal ah kala hadashay waayo-aragnimadooda iyo aragtiyahooda. Natiijooyinka warbixinta waxaa loo kala qaaday 10 aag oo muhiim ah oo fursado ah. Ra'yiga bulshada oo loo kala qaado "aagag koritaan oo muhiim ah," warbixintu waxay xaqiijisay in dejinta qorshaha istiraatiijiga ah aysan noqon arrin maamul oo aan laga miro-dhalin karin, balse ay noqoto jawaab toos ah oo ku aadan khibrad-nololeedka bulshada Saint Paul.

Kulamada Bulshada, Ra'yi Ururinada & Isu Imaatinada Ardayda

Degmada waxay qabatay dhacdooyin badan oo ka-qaybgalka bulshada ah inti u dhaxaysay bilihi Febraayo iyo May 2026, oo ay ku jiraan kulamo fogaan arag ah iyo kuwo fool-ka-fool ah, kooxaha diiradda oo ay fududeeyeen hoggaamiyeyaasha dugsiga iyo degmada, ra'yi ururino, iyo shirarka ardayda dugsiga sare. In ka badan 3,000 oo isugu jira ardayda SPPS, qoysas, shaqaale iyo xubno bulsho ayaa ka-qaybgalay fursadahaan ka-qaybgalka bulshada isla markaana ra'yi ka dhiibtay aaggaga muhiimka ah, mowduucyada muhiimka ah, iyo soo jeedinta istaraatiijiyadda hordhaca ah. Ra'yi-celintan ayaa kadibna la qiimeeyay loona adeegsaday in lagu hagaajiyo qorshaha xilliga la dejinayay soo-jeedimaha istiraatiijiyadda kama-dambaysta ah.



Doorarka & Masuuliyadaha

Kooxda Mashruuca

Bishi Nofeembar 2025, koox mashruuc oo gudaha ah, oo ka kooban hoggaamiyeyaasha degmooyinka oo ka kala socda Wada-xiriirada, Hawlgallada, Hal-abuurka, Cilmi-baarista iyo Istaraatiijiyadda, ayaa la aasaasay si ay u qaabeeyaan una maareeyaan geeddi socodka qorsheynta. Kooxda mashruuca gudaha ayaa saddex aag oo muhiim ah u kala saaray Warbixinta 100-ka Maalin ee Kormeere Guud Stanley: Waxbarasho Heer Sare ah, U-wada-dhannaansho Loo Qasday iyo Kaabayaal Waara.

Koox-Hawleedka La-talinta

Koox ka kooban 32 xubnood, oo ay ku jiraan ardayda SPPS, waalidiinta iyo shaqaalaha iyo la-hawlgalayaasha ganacsiga/bulshada, ayaa ka mid ahaa Koox-Hawleedka La-talinta Qorshaha Istaraatiijiyadeed si loo xaqiijiyo in aragtiyo kala duwan ay xog siiyaan qorsheynta istaraatiijiyadda degmada. Xubnaha waxay kulmeen inti u dhaxaysay Febraayo iyo May si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan oo ay u falanqeeyaan talada bulshada, u baariaan xogta natiijooyinka ardayda iyo baahiyaha degmada, uga wada-hadlaan mudnaanaha istiraatiijiyadeed iyo wax kala beddelashada, ugana talo-bixiyaan yoolalka, ujeedooyinka iyo cabbirada guusha.

Kooxaha Samaynta Istiraatiijiyadda

Koox 61 xubno shaqaale SPPS ah oo loo qaybiyay sagaal kooxood, midba loo xilsaaray mawduuc kasta oo muhiim ah, marka laga reebo Falanqaynta Faylalka Xarumaha, oo leh koox mashruuc iyo koox-hawleed u gaar ah. Kooxaha ayaa wada-shaqeeyay inti u dhaxaysay bilihi Maarso iyo May 2026 si ay u baaraan una falanqeeyaan xogta ku saabsan mowduucooda una diyaariyaan soo jeedin ay ku jiraan ujeedooyinka, istaraatiijiyadaha, iyo yoolalka SMART iyo qorshe hirgelin ah oo loo bandhigay kooxaha ardayda iyo Koox-Hawleedka La-talinta.

Kooxda Hoggaanka Fulinta ee Sare

Kooxda Hoggaanka Fulinta ee Sare ee SPPS ee siddeeda xubnood ah waxay bixiyeen ra'yi-celin, waxay iska kaashadeen hab-socodka oo dhan waxayna diyaariyeen qaab-dhismeedka qorshaha ugu dambeeya. Kooxdani waxay door muhiim ah ka ciyaartay in qorshaha ugu dambeeya loo beddelo ficil taasoo la horgeeyay Guddiga Waxbarashada bishi Juulaay 2026.

> Qayb ka ahaanshaha koox-hawleedkan waxaan dareemayaa inaan si dhab ah u fahmay baaxadda hawlaha SPPS. Waan ogahay in aanay kaliya danaynin waxbarashada balse ay daneeyaan mid kasta iyo arday kasta. Taasi waa sababta aan kalsooni buuxda ugu qabo inaan dhaho, waxaa jira waxyaabo cajiib ah oo mustaqbalka ina sugaya.
>
> - Arday

Aagagga Mudnaanta iyo Mowduucyada Muhiimka ah

Waxbarid Heer Sare ah

Arday kasta wuxuu helaa waxbarasho tayo sare leh, xog lagu jiheeyo oo dhaqan ahaan ka jawaabta taasoo dardargelisa koritaankooda isla markaana meesha ka saarta daldaloolada la saadaalin karo ee ka jira guulgaarista.

Mowduucyada Muhiimka ah

1. Yaraynta Daldaloolada Guulgaarista & Dardargelinta Waxbarashada
2. Kaabayaasha Horumarinta Joogtada ah
3. Joogtaynta Akhris Qoraalka iyo isku Duubnaanta

U-dhannaanshaha Loo Qasday

Dhammaan dugsiyada iyo waaxaha waxay abuuraan deegaan halkaasoo arday kasta iyo xubin kasta oo shaqaale uu dareemo sharaf, xiriir iyo taageero dhammaystiran.

Mowduucyada Muhiimka ah

1. Anshaxa iyo Ka Tirsanaanta
2. Heerarka Wada-xiriirka Qoyska & Helitaanka Luuqadda
3. Horumarinta Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah
4. Sii Xajisashada & Shaqaalaysiinta Shaqaalaha

Kaabayaal Waara

Ka go'naanta qoondaynta ujeedaysan ee kheyraadka si loo xaqiijiyo in barnaamijyada iyo xarumaha loo habeeyey inay daboolaan baahiyaha ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha, ha ahaadaan kuwa hadda jooga ama kuwa mustaqbalka imaan doona.

Mowduucyada Muhiimka ah

1. Suuq-geynta & Soo Kabashada Diiwaangelinta
2. Falanqaynta Boortofooliyada Xarumaha
3. Falanqaynta Qaababka Qoondaynta Khayraadka Hadda







Aagaga Mudnaanta 1

Waxbarid Heer Sare ah

Arday kasta wuxuu helaa waxbarasho tayo sare leh, xog lagu jiheeyo oo dhaqan ahaan ka jawaabta taasoo dardargelisa koritaankooda isla markaana meesha ka saarta daldaloolada la saadaalin karo ee ka jira guulgaarista.

Mowduuca Muhiimka ah #1

Yaraynta Daldaloolada Guulgaarista & Dardargelinta Waxbarashada

Dejinta hab-waxbarid fasal oo cad, joogto ah, tayo sare leh, xog ku dhisan isla markaana la jaanqaadaya dhaqanka oo ku qotoma aragti wadaag ku aadan waxbarid waxtar leh.

Halbeegyada

1.1.a. Caddeynta habka heer degmo ee loo maro waxbaridda Heerka 1 kaas oo ku qotoma faham wadajir ah oo ku saabsan waxbarid waxtar leh

1.1.b. Beddelista qaab-dhismeedyada qiimaynta iyo isla-xisaabtanka

1.1.c. Is-waafajinta barashada xirfadeed ee dhammaan shaqaalaha waxbarashada ee SPPS

Mowduuca Muhiimka ah #2

Horumarin Joogta ah

Joogteynta dhaqan ku dhisan horumarin joogta ah halkaas oo dhammaan shaqaaluhu ay awoodaan loona awoodsiiyo inay ardayda ku dhex milmaan heerar kala duwan oo taageero ah, taasoo keenta guul tacliimeed iyo mid shakhsiyeed oo xooggan.

Halbeegyada

1.2.a. Sameynta faham wadajir ah oo ku aadan yoolalka horumarinta ee nidaamka oo dhan

1.2.b. Dhisidda & hirgelinta qaab-dhismeed abaabul oo aqoonsanaya iskuna xiraya kooxaha heer degmo iyo heer dugsi iyadoo la raacayo qaab-dhismeedka MnMTSS

1.2.c. Hoggaamiyeyaasha degmada iyo dugsiyada ayaa fududeeya horumarin nidaam oo joogta ah

Mowduuca Muhiimka ah #3

Joogtaynta Akhris-Qoraalka & isku Xirnaanta

Mudnaan-siinta akhriska iyo wax qorista iyada oo loo marayo qaab-dhismeed degmada oo dhan ah kaas oo waafajiya waxbaridda akhriska iyo wax qorista oo tayo sare leh, xog ku dhisan, dhaqanka la jaanqaadaysa isla markaana bixiya qaab-dhismeedyo isla xisaabtan ah oo la wadaago.

Halbeegyada

1.3.a. Sameynta nidaam isku xiran oo degmada oo dhan iyadoo la caddaynayo mudnaanaha lana jaangoynayo hababka, lana adeegsanayo qaab-dhismeed joogto ah oo ku saabsan kormeerka iyo isla-xisaabtanka

1.3.b. Naqshadeynta dariiqooyin barasho xirfadeed oo shakhsiyeed oo loo siman yahay oo ku salaysan qaab-dhismeedka akhris-qoraalka PreK-12

1.3.c. Is-waafajinta dhammaan go'aamada la xiriira waxbaridda iyo barnaamijyada ee heerarka fasallada oo dhan

> Waxaan u malaynayaa tani inay u horseedi doonto wax waaridoona oo dan u ah degmada, sababta oo ah Kormeeraha guud sida uu u raadiyaya sidii uu fikradaheena u heli lahaa.
>
> - Xunbin ka mid ah Shaqaalaha







U-dhannaanshaha Loo Qasday

Dhammaan dugsiyada iyo waaxaha waxay abuuraan deegaan halkaasoo arday kasta iyo xubin kasta oo shaqaale iyo qoys ah uu dareemo sharaf, xiriir iyo taageero dhammaystiran.

Mowduuca Muhiimka ah #1

Anshaxa iyo Ka Tirsanaanta

Kobcinta dhaqanka iyo jawiga dugsiga iyo degmada iyada oo la adeegsanayo filashooyin sarreeya iyo xiriirro dhab ah oo si qoto dheer u ixtiraamaya sharafta arday kasta, qoys kasta, iyo xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha.

Halbeegyada

2.1.a. Jaangoynta nidaamyo wax-ku-ool ah oo meesha ka saaraya hababka takoorka ah ee aan dheellitirnayn ee saameeya ardayda

2.1.b. U kobcinta ardayda dugsiyada hoose iyo sare sidi hoggaamiyeyaal iyadoo la adeegsanayo aragtiyada ardayda iyo kobcinta wakaalad madani

2.1.c. Abuurista waayo-aragnimo dhab ah oo kobcisa hoggaaminta shakhsiga ah ama kooxda ah ee waalidiinta/mas'uuliyiinta iyadoo ay jirto ballanqaad wadajir ah oo ku aaddan SPPS

Mowduuca Muhiimka ah #2

Heerarka Wada-xiriirka Qoyska & Helitaanka Luuqadda

Xoojinta xiriirka iyo kalsoonida ay qoysasku ku qabaan dugsiyada SPPS iyadoo loo marayo hab wada-xiriir oo degmada oo dhan ah kuwaas oo ku habboon dhaqanka isla markaana xaqiijinaya in macluumaadku yahay mid cad, joogto ah oo si fudud loo heli karo.

Halbeegyada

2.2.a. Dhisidda dhaqan ku dhisan wada-xiriir cad oo qoraal iyo afba leh taas oo saldhig u ah wada-shaqeynta qoysaska iyo dugsiyada si loo xaqiijiyo guusha ardayda

2.2.b. Xaqiijinta marin-helka loo siman yahay ee macluumaadka iyo adeegyada ee qoysaska, iyada oo aan loo eegin heerka aqoonta luqadda ama naafanimada

2.2.c. Hirgelinta heerarka iyo hab-dhaqannada wada-xiriirka qoysaska ee joogtada ah guud ahaan dugsiyada iyo waaxyaha

Mowduuca Muhiimka ah #3

Horumarinta Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah

Abuurista bulsho waxbarasho oo bixisa taageero dhammaystiran taas oo deegaanka ugu xorriyadda badan uu yahay goob dhiirrigelin leh oo arday kastaa uu ku dareemo inuu si dhab ah halkaas uga tirsan yahay.

Halbeegyada

2.3.a. Ku-daridda Naqshadda Caalamiga ah ee Waxbarashada ee habka wax-dhigista ee Heerka 1

2.3.b. Jadwallada oo la waafajiyo baahiyaha adeegyada gaarka ah ee ardayda ee taageera u-wada-dhannaanshaha

2.3.c. Abuurista hab dib-u-eegis degmada oo dhan ah oo joogto ah oo dhammaystiran si loo xoojiyo aqoonsiga waxbarashada gaarka ah, gudbinta, qiimeynta, meelaynta, horumarinta IEP, bixinta adeegga iyo dhaqamada edbinta

Mowduuca Muhiimka ah #4

Sii Xajisashada & Shaqaalaysiinta Shaqaalaha

Dhisidda iyo haysashada shaqaale kala duwan, oo kobcaya kana tarjumaya tirada ardaydeenna, iyo kobcinta dhaqan degmo oo loo siman yahay oo dhaqan ahaan u wanaagsan oo ka tarjumaya ballanqaadkeenna ku aaddan ka-tirsanaanta iyo sharafta.

Halbeegyada

2.4.a. Abuurista faham la wadaago iyo filashooyin ku aadan ka-tirsanaanta, sharafta iyo sinnaanta oo ay ku jiraan Hababka Aqoonta Dhaqanka

2.4.b. Bixinta tababarka iyo hagidda bilowga ah ee dhammaan shaqaalaha, taas oo xaqiijinaysa in mabaadii'da Siyaasadda 419 ay si firfircoon uga shaqeynayaan heer kasta oo ururka ka mid ah

2.4.c. Hababka shaqaalaysiinta oo la fududeeyo iyadoo heerarka sinnaanta asaasiga ah lagu darayo marxalad kasta oo ka mid ah wareegga nolosha hibada

2.4.d. Horumarinta iyo ballaarinta dariiqyada loo maro xirfadda shaqada iyo fursadaha koritaanka ee ardayda, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada kuwaas oo sida tooska ah wax uga qabanaya meelaha baahida badan ay ka jirto iyo yoolka ah in la kordhiyo shaqaalaha dhaqanka ku fiican ee ka soo jeeda asallo kala duwan







Kaabayaal Waara

Ka go'naanta qoondaynta ujeedaysan ee kheyraadka si loo xaqiijiyo in barnaamijyada iyo xarumaha loo habeeyey inay daboolaan baahiyaha ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha, ha ahaadaan kuwa hadda jooga ama kuwa mustaqbalka imaan doona.

Mowduuca Muhiimka ah #1

Suuq-geynta & Soo Kabashada Diiwaangelinta

Kor u qaadista sumcadda iyo heerka degmada si Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul looga dhigo goobta waxbarasho ee ugu horreysa ee lagu kalsoonaan karo ayna ku soo hirtaan qoys kasta oo ku nool Saint Paul.

Halbeegyada

3.1.a. Dhisidda aqoonsi summad degmo oo xooggan oo si cad u sharraxaya sababta SPPS ay u tahay degmada dookha u ah qoysaska Saint Paul

3.1.b. Dejinta qorshe suuq-geyn degmada oo dhan ah oo qeexaya waxa lagu kala saaro SPPS, isku darka codadka ardayda, qoysaska, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada, qeexida cidda aanu u adeegno iyo waxa aanu bixin doono

Mowduuca Muhiimka ah #2

Falanqaynta Boortofooliyada Xarumaha

Abuurista raad degmo oo waara kaas oo kheyraadkeenna si toos ah ugu maalgelinaya mustaqbalka ardayda isla markaana sare u qaadaya ka faa'iidaysiga xarumaha degmada.

Halbeegyada

Kani ayaa noqon doona qorshaha la aqbalo ee ugu dambeeya ee ka socda falanqaynta boortofooliyada xarumaha.

Mowduuca Muhiimka ah #3

Falanqaynta Qaababka Qoondaynta Khayraadka Hadda

Dhisidda dhaqan ku dhisan horumarin joogto ah oo dhanka maaliyadda ah kaas oo lagu qiimeeyo laguna hagaajiyo qoondaynta kheyraadka si loo daboolo baahiyaha ardaydeenna.

Halbeegyada

3.3.a. Samaynta hubin gudaha ah si loo horumariyo siyaasadaha maaliyadeed ee hadda jira, habraacyada, iyo masuuliyadaha.

3.3.b. Bixinta tababar dhanka maaliyadda ah oo loogu talagalay shaqaalaha maamula miisaaniyadda iyo/ama kala qoondeeya kheyraadka degmada

Qorshaha Hirgelinta

Waxaanu dhisi doonaa degmo xooggan anagoo hirgelinta SPPS 2033 u marayna hab wejiyo ah, oo tallaabo-tallaabo ah. Sahminta wejiyada hore ee hirgelinta waxaa lagu qiyaasayaa inay qaadan doonto ugu yaraan hal sano. Hirgelinta buuxda ee SPPS 2033 waxaa la filayaa Juulaay 2029.

Shaxda soo socota waxay sanad dugsiyeedka 2026-27 u kala qaadaysaa marxalado hirgelin sida uu qeexay cilmiga hirgelinta*

Sahminta

- Qiimeynta u-diyaargarowga isbeddelka
- Kala mudnaansiinta halbeegyada
- Isugu yeerista kooxaha hirgelinta
- Diyaarinta qorshayaasha hirgelinta
- Diyaarinta qorshe la-socod

Fadhiisinta

- Caddeynta doorarka, mas'uuliyadaha iyo qaab-dhismeedka warbixin-bixinta
- Diyaarinta kheyraadka loo baahan yahay
- Tababarista hoggaanka kooxaha
- Gaba-gabaynta qorshayaasha hirgelinta iyo la-socodka

Hirgelinta Bilowga ah

- Tababaridda shaqaalaha
- Bilaabista hirgelinta tallaabooyinka mudnaanta leh
- Sameynta koox-hawleedka la socodka

*Cilmiga hirgelinta waa habka isbeddello la qorsheeyay lagu bilaabo laguna dhex daro hawlaha maalinlaha ah si loo gaaro natiijooyinka la hiigsanayo.

Wixii xog dheeraad ah, booqo

spps.org/2033



Saint Paul
Public Schools